

Ku safar Galbi fayooban.

Markaad socdaalkaaga kala kaashatid hey'ad socdaal oo TICO ka diwaangashan, si ootomatik ah 'automatically' ayaad maalgalinta safarkaaga u badbaadinaysa.

TICO waa Badbaadinta Macmiilka ee maalgalinta safarkaaga, 'watchdog' ilaalinta qof kasta oo safarkiisa kala kaashada hey'ad socdaal oo TICO ka diwaangashan.

Haddii aad qof ahaan ugu tagto, telefoon kula xiriirito ama internetka, markaad wax ka iibsatid hey'ad socdaal oo TICO ka diwaangashan, waxaad ku niyadsan tahay adoo ka war qaba in TICO halkan u joogto in ay ku caawiso.

Sidaan ayeey ku caawinaysaa:

Nidaamin

TICO waxey nidaamisa howlaha socdaalka ee Ontario.



Iyadoo ay khasab ku tahay in hey'addaha socodaalku ee Ontario gidigood iska diwaangeliyan, TICO waxey xaqiijinaysaa in hey'adduhu racaan Sharciga u degsan hey'addaha ka howl kala Ontario 'Ontario Travel Industry Act'. Taasna micnaheedu waxaa weeye waa inay sharciga u haagansamaan.

Taaso micnaheedu yahay in arrimaha ay ka mid yihiin qaansheegta oo loo qoro si quman dadkana si bayaan ah loo tuso, xayeesin run ku saleesyan iyo fulinta nidaamka maaliyadda- iyo inay lacagta akoonto aamin ah 'trust' ku sii keeydiyan. Waxaan kale oo egeeyna inay u dhigman heerka aqooneed ee laga doonaya howlahaas.

Kormeerridda

TICO waxey kormeerta ayna dusha ka eegta hey'aadaha socdaalka ee Ontario.



TICO waxey hubisa in hey'aadaha socdaalka oo aad wax ka iibnasnaysid ay si aan leexleexasho lahaayn u fuliyaan shariyada badbaadinta macmiilka, kuwasoo dhammaan waafaqsan sharicga 'Ontario Travel Industry Act'. TICO waxey kormeerta ayna dusha ka eegta hey'aadaha oo dhan, waxeeyna edbisa kuwa u hogaansami waaya shariyadaan.

TICO waxey hormarisaa tartan cadaalad iyo anshax ku saleesyan, waxey tageerta Xeerka Nidaamka Anshaxa 'Code of Ethics' waxeeyna dhirigalisa dejinta shariyada iyo waxka badelidda nidaamyada.

Waana arrin sahlan maadaama dhammaan hey'addaha socdaalka oo ka howl gala Ontario ay tahay in ay ka diwaangashan yihiin TICO. Taaso ah sharci.



Soo-celinta lacagta

TICO waxeey dib u soo celisaa lacagta adeegyada aan laguu qaban oo aad kharajkooda bixisay.

Haddii aad adeegyo ka iibsatay hey'ad socdaal oo ka diwaangashan TICO aana lagu fulin adeegyadaas, taaso ku imaan karta xiritaan ama musalafid 'bankruptcy', TICO weey ku caawini.

Markii markabka dalxiiskaagu 'cruise line', shirkadda dayuuradaha ama xitaa hey'adda socdaalku ay gabto inay kuu qabato adeegyadaas, TICO waxey qofkiiba dib ugu soo celinaya ilaa iyo shan kun oo doolar. Xaaladaha qaarkood, markii socdaaleyalku aay xayirmaan, guriga ayaan xitaa dib ugu soo celinaya.

Sida loo bixinayo Dhigaalka Lacagta Magdhabidda waxey ku qaran tahay qodobbada Nidaamka Ontario ee 26/05.



Cabashooyinka

TICO wexey kaa caawineeysa marxaladda cabashooyinka.

Waxaan mar walba ku rajeeynaya in socdaalkaagu u si wanaagsan kugu dhammaado, laakin haddii aadan raali ka ahaayn oo ay u muuqato in adiga iyo hey'addada socdaalku udin xaaladda xallin karin, waan idin caawin karna. Laakin xasusnoow, haddii hey'addada socdaalku ayan TICO ka diwaangashaneyn, wax saas ah ma aan qaban karno.

Haddii safarkaaga aad ula kaashatay hey'ad socdaal oo ka diwaangashan TICO, TICO waxey kaa caawineeysa marxaladda cabashooyinka, waxey la xiriireysa hey'addaada socdaalka waxeyna hubineysaa in shariyada badbaadinta macmiilka si quman loo fuliyey.

Inkastoo aanun heshiis khasab idinka dhigi karin ama aanan idin dhexdhexaadin karin, waxaan hubineyna inaad heshid marxalad ka caawineeysa xalliinta waxa aad ka cabaneysid.

Talooyin ku saabsan iibsashada waxyaabo Socdaal la xiriira

Talo #1

Markaad internetka ka iibsaneeysid adeegyo socdaal, marwalba iska hubi in shirkadda aad la xiriireesid ay TICO ka diwaangashan tahay si sharciyada badbaadinta macmiilka ee Ontario ay kuugu shaqeeyaan.

Talo #2

Haddii aad wax ku iibsatid kaash ama kredid kaar 'credit card', marwalba iska hubi in aad ka heshid hey'addaada socdaalka qaansheeg iyo risiid markii aad wax ka iibasatid.

Talo #3

Markaad arrimo socdaal la xiriira aad ka iibsaneeyso internetka, ogoow cidda aad lacagta siineeysid. Yaa kredid kaarka lacagta kala baxaya? Ma shirkadda internetkabaa mise waxey wararka lacag bixintaada u gudbinayaan howlwadeen 'tour' ama shirkad diyaaradeed oo ay suurtoowdo INEYAN TICO ka diwaangashaneeyn.

Talo #4

Intaadan internetka ka ansaxin adeegyadaada hubi in aad iska akhrisid muddada iyo sharuudaha khaasatan kuwa ku saabsan burinta, badelidda iyo suurta galidda lacag celinta.

Talo #5

Marwalba baaris samee– iska ogoow in dalka aad qorsheeyneysid in aad booqatid uu heerkiisa maciishaddu u ka duwan yahay kan Canada–si aadan hadhow uga argagaxin xaaladda maciishadda ama aadan u filan in aad luuq walba ka hesho hoteelo heer sare ah, makhaayado iyo nightclubyo. Ogoow ineyan jirin qiyaasta habka xiddigaha hoteelada oo caalami ah, sidaas darted hotel Canada looga qiyaasey 4 xiddigood waxaa suurtowda inuusan u dhigmin hotel 4 xiddigood ee dalka aadku tala jirtid booqashadiisa.

Talo #6

Hubi in aad ka warqabtid warqadaha socdaalka ee qofwaba laga doonayo xaqijijina in aad ugu talagashid wakhti ku filan helitaankooda inta ka horeysa wakhtiga loo qoondeeyey bixitaankaaga.

Talo #7

Iska hubi in aad ka warqabtid muddada iyo sharuudaha adeegyada socdaalka aad iibsaneeysid khaasatan bedelidda ama kuwa ku saabsan burinta 'cancellation' .

Talo #8

Waa rayi wanaagsan in aad marwalba gadatid burinta iyo caaymiska caafimaad ee gobolka ka baxsan–Khaasatan markaad aadeeysid dal dibeedda ah. Is diyaari!!!!

Talo #9

Su'aalo weeydi. Weeydi xubnaha qoyskaaga, asxaabta iyo xitaa howlwadeenkaaga socodaalka in aay horey u tageen meesha aad qorsheeynaysid in aad boogoto kana ogoow waxaeey kala kulmeen iyo waxa ay kula talinayaan markii loo safrayo meesha aad u socotid.

Talo #10

Ha isku daalin waxyaabo yaryar yeeyna arrimo la mid ah sida dahitaanka dayuuradda aad raaci lahayd ka qaribin fasaxaaga. Naftaada u raaxee!



Travel Industry Council of Ontario

Travel Industry Council of Ontario

55 Standish Court, Suite 460, Mississauga, ON L5R 4B2

Tel: (905) 624-6241 | Fax: (905) 624-8631 | Toll: 1-888-451-TICO

Email: tico@tico.ca | Website: www.tico.ca